

# Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Dhageysiga firfircoonnaanta ay kujirto gudaha goobta shaqada

Muqa 8, Nuqulka 1

Warsidihii hore ee journalka iyo xaashida talobixinta ayaa si kooban u soo bandhigeen sifooyinka Hogaanka Badbaadada, markaa bishaan waxaan bilaabi doonaa taxanaha hab munaashaqo/ka-dooditan ah oo ku saabsan Dhageysiga Firfircoonaanta leh.

Dhegeysiga firfircoonaanta leh wuxuu yimaadaa marka adiga oo kormeere ahaan ah aad si qoto dheer ugu hawlan tahay oo aad u fiirsato waxa shaqaalahaagu dhaho. Waxay u baahan tahay dhegaysi ka badan hadalka.

Hadafka Dhageysiga Firfircoonaanta kujirto waa in la fahmo aragtida shaqaalahaaga, iyada oo aan loo eegin haddii aad la ogoshahay.

Udhageysiga sida firfircoon iyo ku celcelinta waxa uu khudbad jeediyuhu yidhaahdo qaab erayadaada ah waxay idinka caawinaysaa inaad labadiinaba sii wadataan isku-hawlaanta waxayna wanaajisaa wada xidhiidhka idinka dhexeeya, shaqaalahaaga iyo dadka ay wada shaqeeyaan.

Maamulka waxay u isticmaali kartaa dhageysi firfircoonaanta kujirto qalab ahaan si ay u dhisaan xiriir wanaagsan shaqaalaha oona ay ka hortaggaan dhaawacyada goobta shaqada.

Dhegeysi firfircoonaanta kujirto wuxuu hagaajiyaa xidhiidhka, xaaladaha shaqada, wuxuuna caawin karaa ka hortagga dhaawacyada goobta shaqada.

Wareysi cilmi-baaris ah oo ku saabsan badbaadada, ilaaliye ayaa la wadaagay waayo-aragnimo togan/wanagsan oo ay kala kulmeen habka dhegeysiga firfircoonaanta leh ee kormeerahooda. Waxay dareemeen in la fahmay oo ayna ammaan yihiin sababtoo ah kormeerahoodu waxa uu mudnaanta koowaad siiyay ammaankooda isaga oo dhegaysanaya oona ka qeybgalaayo baahiyahooda hab koox ahaan ah.

Hoos waxaa ah tusaale kormeere si firfircoon u dhegaysanaya, qaadaya tallaabo, oona joojinaaya dhibaataaynta la-shaqeeyaha:

" Iyo ka dib markii aan la hadlay isaga, [wax ku saabsan dhibaataada la-shaqeeyaheeyga], wuxuu ii sheegay inaan is dejiyo, inuu si toos ah ula hadli doono dadkaas. Wuuna sameeyay, wuu la hadlay iyaga [kulan kale]. Taasina waxay iga caawisay inaan dareemo ammaan, inaan ku raaxaysto shaqada"

Taas bedelkeeda, kormeerayaashu waxay u banaan dhigi karaan shaqaalaha khataro. Tani waxay dhacdaa marka ay ku guuldareystaan inay si firfircoon u dhegaystaan oo ay mudnaanta siiyaan mas'uuliyadda ka saaran wax ka qabashada badbaadada khataraha, ka hortagga dhaawaca iyo yaraynta sheegashooyinka caymiska.

Hawsha maalinlaha ah ee Maria waxay ahayd inay tirtirto sagxadaha xafiiska. Waxay dareentay in tirtiraheedu bilaabayso inuu kala daato, waxayna wacday kormeeraheeda si ay u weydiiso tirtire cusub. Kormeeruhu wuxuu sheegay inay dalban doonaan mid sida ugu dhakhsiyaha badan. Dhawr maalmood ka dib, tirtiruhu wuu sii xumaanayay, Maria waxa ay gelineysay awood badan si ay u nadiifiso, taas oo ku keentay xanuun garbaha. Aakhirkii waxay mar labaad wacday kormeeraheeda si ay u weydiiso tirtire cusub kormeereheeduna wuxuu u sheegay inay illoobeen inay dalbaan. Maria waxa ay go'aansatay in ay xareyso sheegasho caymis si ay u hesho daweynta xanuunka garabkeeda.

Kormeerayaasha ku dhaqma dhegeysi firfircoonaanta leh waxay ka hortagaan khataraha badbaadada iyo dhaawacyada hab muddo dheer. Dhisida xiriir wanaagsan oo lala yeesho shaqaalaha, shaqaaluhu waxay qabsan karaan shaqadooda iyagoo og in welwelkooda ammaan la maqli doono oo wax laga qaban doono. Baahida loo qabo dhageysiga firfircoonaanta kujirto ee kormeeraha iyo ka jawaab-celinta degdega ah ee khataraha badbaadada waxay ahayd nooc is dhexgal caadi ah oo lagu muujiyey waraysiyada kooxda waardiyaha.